



Fariin ku saabsan bisha Abriil 20keeda oo ah Maalinta Ardaydu Iskuulada fasax la'aan ka baxaan (Bannaanbaxaan)

Qoysaska Qaaliga Dugsiyada Dadweynaha Portland,

Hadal haynta mawduuca nabadgelayda iskuuladu wuxuu noqon doonaa mid mar labaad dhammaan wadanka oo dhan uga soo muuqda maalinta Jimcaha ah, Abriil 20keeda, maalintaasi oo loo asteeyey inay noqoto Maalinta Ardaydu Iskuulada Bannaanbaxaan. Maalintaas waa maalin qadarinteeda leh maadaama ay tahay xuska toogashadii sanadkii 1999 ka dhacday Dugsiga Sarre ee Columbine kuna yaala gobolka Colorado. Haddaba Dugsiyada Dadweynaha Portland ahaan waanu taageersanahay wada-hadaladaasi ay ardaydu dhexdooda ka abbaabuleen iyo tallaabooyiinka iskuulada lagaga dhigayo inay noqdaan kuwo nabadgelyo ah, soo dhaweyn leh, sida ugu macquulsan loo dhan yahay. Sidaas awgeed, marka aad eegto dhinaca nabadgelyada oo aanu siino mudnaanta koowaad uma oggolaaneyno ardaydu in ay ka baxaan dhismayaasha iskuulada.

Waxan rajeyneynaa in waqtigani gaarka aad u qaadata sidii aad ula hadli lahayd ardeydiinu sidii codkooda ay ugu kordhin lahaayeen doodan socota ee ku saabsan nabadgelyada iskuulada iyo xasarada hubka (qoryaha). Arrimahani waa arrimo runtii muhiim inoo wada ah sidii aan dhammaanteen doorkeena masuuliyadeed uga qaadan lahayn. Waxaan sidoo kale aan rajeyneynaa in aad hubisaan in meesha aad wada hadaladaasi aad ku yeelan kartaan ugu nabadgelyada badani ay tahay dhismayaasha iskuuladeena waqtiyada ay iskuuladu furan yihiin. Marka ay ardaydu iyagu doortaan inay iskuulada bannaanka uga baxaan ama bannaanbax uga baxaan iyada oo iuu skuulku furan yahay oo waxbarashadiina socoto maalintii, suurtagal ma ah in aan ballanqaado nabadgelyadooda. Intaas waxaa dheer, waxa aan la hadalnay Xafiiska Ciidanka Nabadgelyada Portland, taasi oo iyaguna nagu wargeliyeen in ayna hayn agabkii ay ku kormeeri lahaayeen ama ku soo faragalin lahaayeen munaasabadani ay ardaydu dhismayaasha iskuulada kaga baxayaan saacadaha waxbarashadu ka socoto iskuulka.

Waxaan si dhow ula socon doonaa hawlaha iskuulada maalinta Jimcaha, iyada oo xaqiijin doono sidii aan ula socodsiin lahayn bulshada iskuulada haddii jadwalkii bannaanbaxaasi qorsheysani wax iska bedelaan ay ardaydu dhismayaasha iskuulka kaga baxayaan. Waxa aan waaldiinta iyo cidii kaleba u diyaarinay khad telefoon oo dhexe "hotline" oo ay soo wici karaan si ay u helaan wixii su'aalo ay jawaabtooda ay raadinayaan ama dareenka ay ka qabaan arrintani: **503-916-6600**. Telefoonkani wuxuu yeelan doonaa shaqaale ka shaqeeya oo ka jawaaba wicitaanka maalinta Jimcaha oo dhan.

Halkan waxaan idiinku soo gudbineynaa su'aalo iyo jawaabo ku siin kara tilmaamo dheeraad ah:

Q: Ardaydu haddii ay iskuulka ka baxaan ciqaab miyey muteysanayaan ?

A: Ardaydu wax ciqaab ah ma mutesan doonaan, laakiin waxa noqon doontaan bixitaan ay ka baxeen dhismaha iskuulka mid aan cudur daar lahayn. Qoysaska iyo shaqaalahu waa in ay ogaadaan waxaa jira siyaasada Guddida Waxbarashada oo ka hadlaysa muwduuca dhaqdhaqaaqyada siyaasada ama bixitaanka iskuulada waa in la muneeyaa.

Q: Maxaa dhacaya haddii waalidiintu ay iskuulka u soo diraan qoraal ay ardeydooda ugu ogolaanayaan inay ka qeybgalaan bannaanbaxaa?

A: Qoraalkaasi waalidku noqon maayo mid u cudur daara ardayga ka qeybgalkiisa hawlaha uu dhismaha iskuulka kaga baxayo si uu uga qeybgalo bannaanbaxaa .

Q: Haddii ay ardaydu dhismaha iskuulka ka baxaan, shaqaalaha iskuulku miyey raacaayaan ardayda?

A: Taasi waxay ku xiran tahay tirada ardayda ee ka qeybgalaysa, waxa suurtagal in maamulaha iskuulku uu weydiiso shaqaalaha inay raacaan ardayda si ay uga caawiyaan inay xaqiijiyaan sidii ay u noqon lahaayeen kuwo nabdoon, laakiin ma hoggaaminayaan ama si firfircoon ugama qeybqaadanayaan bannaanbaxaa ka dhacaya bannaanka dhismaha iskuulka.

Q: Haddii ay ardaydu dhismaha iskuulka ka baxaan, miyuu ciidanka nabadgelyadu booliisku ka caawinayaan sidii loo xaqiijin lahaa nabadgelyadooda?

A: Waxa ay noo sheegeen in Xafiiska Ciidanka Nabadgelyada Booliisku inaysan haysan agabkii ay ku kormeeri lahaayeen bannaanbaxaa aan oggolaanshaha haysan ee dhismaha iskuulada lagaga soo baxayo.

Q: Maxay waalidiintu qaban karaan si ay u caawiyaan ardeydooda?

A: Fadlan mawduucan muhiimka ah kala sheekeysta ardaydiina iyada oo la socon doontaan fariimaha ka imanaya muumalaha iskuuladiina. Waxa aan ka warheynaa in munaasabadahaasi waqtiyadii hore ay ardaydu doorteen in ay ubaxaan qof-qof ama iyaga oo kooxo ah. kala hadla ardaydiina arrimaha ku saabsan sidii ay u noqon lahaayeen kuwo nabdoon oo aad xiriir la yeelataan inta ay ku jiraan bannaanbaxaa.

Waad ku mahadsan tihii dhamaantiin taageerada aad siisaan iskuuladeena. Sharaf bay ii tahay in aan u addeego ardaydiina .

Dr. Yvonne Curtis, Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada